# **XURAYNTA DALKA HAATAN KU JIRA GACANTA GUMEYSIGA**.

## **Dhabbayaasha halganka**
## **Iyo Hababka howlgallada**

**Dr. Shariif Saalax Maxamed Cali.**

### **Gogoldhig**:

Gumeysiga Soomaaliya qabsaday marka haatan ah, waa isla kii dalkeenna duullaanka ku soo ahaa, sida ku cad xusuusta qoran, 7dii boqol sano ee la soo dhaafay. Waa markii lala kowsiiyo boqortooyadii Reer Sulaymaan ee Xabashida, heerkeedii cusbaa (New Solomonic Dynasty),kolkay baabba'day boqortooyadii Zagwa,*1 ee Xabashida, dhulkaana uu qabsaday boqorkii Amda-Siyon(1314 - 41). Laga billaabo taariikhdaa, ilaa waqtigan la joogo, marna ma kala joogsan duullaanka Xabashidu dalkeenna ku beegsanayso. Menelik, Haile Sellasie,Mengustu Haile Mariam iyo Melles Zenawe waa horseedeyaashii isticmaaarka madow, oo mar walba u hanqaltaagayay inay qabsadaan badaha Soomaalida, gaar ahaan gobollada Koonfureed, oo ku yaalla Bad-Waynta Hindiya. *2

20kii sano oo la soo dhaafay, Ethiopia waxay isu diyaarinaysay siday Soomaliya, xeelad iyo xoogba, ugu qabsan lahayd, wayna ku guuleysatay, weliba, iyadoo Reer Galbeedka iyo dalalka Afrika u sacabtumayaan. Arrintan waa mid ugub ku ah caalamka, iyo xiriirka dawladaha xorta ah, oo lagu jideeyay qaanuunka caalamiga ah(International Public Law).

Dowladaha ka dambeeya qabsashada Ethiopia ee Soomaliya, kuwa la og oo isqaafinaya, kuwa gunuunacaya aan qeexnayn waxay rabaan, dhammaantood way wada oggolihiin inay qabsashada Xabashidu raagto, si loo tijaabiyo nidaam cusub, oo isticmaar ah, oo lagu maquunsho dalalka taagta daran(New International Imperial Order).Mana aha ujeeddadaani mid lala yaabo, iyadoo la bannaystay qabsashada iyo la dagaallanka dalal badan, oo hore u madaxbannaanaan jirey.

Kuwa u hanqaltaagaya inay cudud militari ku muquunshaan dalalkii xorta ahaa, waxay u socdaan in la duudsiyo xuquuqda shucuubtaa, kheyraadkoodana la booboo jahliga iyo fuqriga ku abaadaan, tuugsi

---

*1 *Fiiri Mohamed Hassen – The Oromo of Ethiopia- The Red Sea Press I ED. 1994,P5 and P.25- Boqorkan waa midka aasaasay isticmaarka amxaarad,.waana kan sii huriyey dagaalladii gaalada iyo muslinka u dhexeeyay quruuntii dhexe(Middle Age).*

*-Fiiri Sheekh Axmed Riiraash-kashfussuduul;*

*-Fiiri short encyclopedia of Islam-Cornell Universit, New York 1953.*

*2*Fiiri Ugo Ferrandi- Lugh Emporio Commerciale - Fiiri Vittorio Bottego – Il Giuba Esplorato.*

Iyo gacan hoorsi la bado, iyadoo Ilaahay ku mannaystay hodontooyada khayraadka dabiiciga ah iyo cudud iyo caqligii aaddane, ay wax ku tabcan lahaayeen.*3

## **B .XAQIIQADA QEEXAN.**

Danta Xabashida iyo tan Reer Galbeedka waa midaysantahay,kamana maqna “casabiyad diineed “ siday qoreen muxalliliinta Reer Galbeedka qudhoodu. *4
Hoosaasinta gardarrada ah,runta la af-duubay, tacaddiga baaxada wayn ee Xabashidu u gaystay Soomaliya, gaar ahaan Muqdisho, guddigii xiriirka caalamiga(ee arrimaha Soomaaliya)wuxuu isku dayay inuu qariyo, siduu ku caddeeyey fadhigii London ee 6dii bishan Juun.Dhaqankaa wuxuu tilmaan u yahay gaboodfalka qotoda-dheer, iyo jabka lala damacsanyahay Soomaaliya.
Hadalladii ka soo yeeray ergooyinkii shirkaa waxay u badnaayeen ereyo maldahan, oo mudaahano loola jeedo, loolana jeedo in lagu dhagro dadka intiisa aan foojignayn, ama si qoto leh arrimaha Soomaaliya ula socon. Laakiin horseedka imberyaaliyaddu waa inuu ogaado inuu dhammaaday waagii dalalka ay damacsanyihiin inay gumaystaan, ay caaqilladooda kaga iibsan jireen “kuulo birbirqaya” iyo “hilgado naxaas” ah, dumarkoodu isku qurxiyo.
Qolada “xiriirku”(iyagoo fulinaya go’aannada dowladahooda), mowqifkii, ay dalkeenna ku qabsadeen, millimeter( 1 mm )kamay leexan,wax cusubna kumay kordhin. Waxay beddeleen, oo qur ah, habka ay wax u soo jeediyeen oo dibloomasi ah:”Soavitur in modo fortier in re “(ama sida reer Baydhaboodku yiraahdaan: “doorada ”kiig” ha gurtee, adigu baalasha ka rif”). Sida la wada ogyahay, inteenna dalka iyo dadka u danaynaysa, waxaan Bulshada Caalamka u soo jeedinnay fikrado wax ku ool ah, oo lagu xallin karo dhibaatooyinka ka jira Dalkeenna,ayna ka mid yihiin :

---

*Fiiri Salah Mohamed Ali – Huddur – Nahda Publisher, 2005 - Cairo P.49 ; P.94 ; P.432(Zaila-Ogaden exchange “project”1947).*

*3*Madaxweyne Issias Afwarki waa khudbadduu akhriyey, munaasabaddii xuskii Istiqlaalka Eritrea ee 16 aa,isagoo sheegay : inay raalli ka noqon Karin arrinta ah : “let us bind the hands with which you work and eat, and, let us spoon-feed you”(naga oggolow) inaan shakaalno sacabbadaad ku xoogsanaysay,waxna ku cunaysay,(nagana oggolow) inaan cuntada afka kuugu gurno!*
*Sidoo kale, Soomaaliya waxay soo saari kartaa 10 milyan tan oo cunno ah, hadday hesho nabad iyo dawlad waddani ah,mana u baahna cunno- dibadeed.*

*4 *The Economist- April 14th -20th ,2007.P.46 maamulka W.Bush ayaa gaar ahaan u cuskaday aragti diineed, u hiillinta Xabashida, iyadoo la qoray:”some in the Bush administration see”Christian Ethiopia…..As a bulwark against Islamist expansion in the Horn of Africa”(Xabashidu waa xaydaabkii laysaga difaaci lahaa is-ballaarinta Islaamka ee Geeska Afrika).*

Dhinacyadii dagaallamay, inay isla gaaraan"xabbad joojin"(is-aqoonsi ayaa ku jira meeshaa).Ciidammada Xabashida Dalka laga saaro. Ka dib la soo dhammaystiro ciidammada Amisom( ama tallaabadaa laga hormariyo ka bixidda Xabashida Dalka)."Emergency" la qaado; inta xabbisan la siiddaayo. Markaa ka dib, meel "habboon" shir siyaasadeed lagu qabto, lagana arrinsado arrimaha laysku hayoo dhan.

Waxaan caddaynay "shir bulshadeed" inuusan dhibaatooyinka jira xallinayn, yahayna marin-habaabin, loogaga gol leeyahay in bulshada caalamka "dambas indhaha looga sayro"

Waxaan kor iyo hoos ugu sheegnay, dowladaha Reer Galbeedka culayska leh, iyo kuwa annu is niri way ka garaabayaan dooddiinna caaradda leh, caqligalkana ah, inaan Soomaalida laga luminin fursad dib-u-heshiisiineed siyaasi ah. Sidaa aawadeed, ujeeddooyinkaa aannu lahayn Dalku ha ku nabdoobo,heshiisna ha lagaga gaaro, waxba kama qabsoomin.

Dalalka Reer Gaalbeedka, oo adeegsaday ciidammada Ethiopia, hadday Soomaaliya nabad la rabaan iyagay wax walba ka falmaan. Ethiopia, iyo rejiimka maqaar-saarka ah, amarkay Galbeedku bixiyaan bay fuliyaan. Hayeeshee, waxaa muuqata inay dowladahan doonahayn in la bakhtiiyo dabkay ku shideen Soomaaliya, sii holcintiisa mooyee.

Maxay yihiin dhabta hadalladaa qurxoon, iyo walaaca aad mooddo inay muujinayaan Dowladaha Soomaaliya daneeya.

| EREYADA XARIIRTA HUWAN | DHABTOODA DIIR SAARNAYN |
| --- | --- |
| 1. Amisom waxay dhidibbada u aasaysaa Dowladda sii "gaamuraysa" ee Soomaaliya.*5 | 1.Danahayaga awgood, waxaan kursiga ku cel-celinaynaa xukun fadhiid ah,waxba qaban Karin. |
| 2. Si uusan firaaq(Vacuum) u iman,*6 Ciidammada Itoobiya oo haatan Dalkooda inay ku laabtaan | 2. Ciidammada Itoobiya Soo-maaliya inay qabsadaan an-gaa u xalaalaynay,oo intay |

*5 ***"AMISOM was deployed to help stabilize Somalia's fledgling TFG".P.Lynn Pascoe(Under Secretary-General for political Affairs(ayaa yiri).***

*6 ***Security Council Resolution 1744, 21 Feb.2007. 4 bilood baa ka soo wareegtay. Meeshay xabashidu dalkeeda kaga laaban lahayd dagaal bay shacbiga Soomaaliyeed la gashay ,dhibaato la wada ogyahay bay gaysteen, wayna soo kordhayaane,meelna uma socdaan.***

billaabay,waxay ku simayaan kuwa Amisom. *7

3. Tallaabaan ka qaadaynaa kuwa Diiddan Nabadda.*8

4. Aad baan uga walaacsannahay *9 xaaladaha Soomaaliya(liita)ee aaddanenimo.

5. Dagaal laguma xallin karo xaa-ladaha murugsan ee Soomaaliya.*10

6. Shir heshiisiineed, oo loo dhanyahay waa in la qabtaa. Shirkaa cidina kama reebboona,si Soomaaliya nabad iyo deggenaansho raaga loogu soo dabbaalo.

rabaanna joogaan.

3. Kuwa diiddan xukunkayaga iyo gumaysiga Itoobiya waa la Dagaallamaynaa.

4. Waxba nagama gelin inta Soo-maaliya ku baaba'aysa, dad iyo maal.

5. Dagaalka Soomaaliya waa in la sii holciyaa, wax walbana dambas noqdaan.

6. Nabadda Soomaaliya,waxba nagama gelin(Illeen waa kuwii burburiyaye)Haddii shir Isimo loo qabtana ku filan."shir la qabto"unbaan rabnaa, xitaa haddii laga qaybgeliyo askarta Xabashida,mar haddaan sawiran Karno, dad mad-madow,oo meel gabran, una gudbin karno,warbaahinta aanu xukunno, ee Dunida.

---

*7. *Isla go'aankaGolaha Ammaanka ee kor ku xusan.*

*8. *Isla go'aanka 1744.Hhadduu calaacalkaa run yahay maxay Xabashida uga qaban waayeen murugaday markaa ka dib ay gaysata.y.*

*9. *Waa halhayska Reer Galbeedka, waxna kama dharbana ,iyagaana dagaalka wada, iyo xasillooni darrada ka jirta Soomaaliya.*

*10. *Qaraar1744, 21 Feb. 2007, xoog wax laguma xasillin karo. Haddayba Amisom ku guulaysato inay Xabashiday xilka kala wareegto,,kaalinta kuwan dambe ay hadda ku jiraan unbay galayaan, oo ah dagaal. Amisom waxaa loo dhisay in rajiimka la dhoobay ilaaliyaan (fiiri qaraarka Golaha Amniga ee 1725 ee 07/12/2006).*

7. Amisom waxaa laga doonayaa Inay Bilowdo xasilinta Soomaaliya.

7.Amisom waa ciidan dagaal loogu talagalay waqtiga dhow. kamana reebbana inuu xoog isticmaalo(use of force)si "nabadda loo xasiliyo" waa Saldhiggii Ciidamada ka dagaallami doona Soomaaliya, oo meelo badan laga soo ururin doono, sida Ciraaq iyo Afghaanistaan.

8. Waxaan cambaaraynaynaa *11 kuwa Isku dayaya inay isticmaalaan Cunfiga si ay u-horjoogsadaan Gaaridda horumar siyaasadeed. (Xeerka Caalamiga waxuu bannaynayaa in layska caabbiyo,oo lala dagaallamo, cadow dalkaada soo Weeraray.)

8.Waa ineeyan jirin cid diidda,tacaddigayada, iyo Xabashida aanu adeegsannay. Taladayada lama hor-istaagi karo,waxaana soo saari doonaa xeer aanu ku ciqaabayno kuwa amarkayaga ku caasiya.

---

*11.*Fiiri bayaankuu soo saaray Guddoomiyaha Golaha Ammanka John Verbeke (Belguim) S/PRST/2007/19. Shirka Golaha Ammaanka lagaga hadlaayey Soomaaliya wuxuu socday 7 daqiiqadood, qur ah (12:18 – 12:25,) -Fiiri lambarkaan kor ku xusan.*

## BUURTA DIBINDAABYADA FIIDDEEDA QUR IHI MUUQATO.

Soomaaliya iyo dalaka la bah-wadaagga ah, Reer Galbeedku bartilmaameedsadeen, iyo kuwo kale oo xeredaa loo soo taxaabidoonno, dagaal iyo fitqalallo ayeey ugu talagaleen. Ujeeddada dowladaha quwadda wayn waxay tahay in la beddelo, si qoto leh, “nidaamka dunida{haatan} ka jira”.*12.

Dalalka la beegsanaayo lama muquunin karo haddaan wax laga beddelin qiyamkooda(values); muctaqidaadkooda iyo dhaqqammadooda(cultures). Lamana madiidin karo, dhaqaale ahaan kuwa la beegsanaayo , (arrintaa oo ah qasdiga ay u halgamayaan quwadaha waa-wayn,) haddaan maskaxda laga beddelin kuwa la beegsanayo.*13.
Waxay yiraahdaan “xadaaradihii” ba isku dhacay. Isku-dhac majiree waxay doonayaan inay iyagu ku dhacaan kuwa ducafada ah, kuna aabyoodaan oo khayraakooda boobaan.*14.
Xarbigii qaboobaa, loollankii loo baxshay, markuu dhammaaday, galbeedkii gacansaraynta sheegtay waxaa la gudboonaa in kharajkii baaqday ee militiriga sanadkii gaari jiray, wadar ahaan, dhowr tirilyan(dhowr kun bilyan), in loo weeciyo xagga dowladaha saboolka ah, horumarka cilmiga iyo teknooloojiyadda, hagaajinta bay’adda iyo arrimo nolosha aaddanaha sare u qaadaya. Hayeeshee, go’aankii dowladahan aan xusnay wuxuu nqoday inaan waxba laga dhimin miisaaniyadihii militeriga, oo weli la sii kordhiyo, xibnihii gaashaanbuurta la badiyo.*15

---

*12 *Samuel P.Huntington-The clash of civilizations, and remaking of world order – Simon & shuster paperbacks,1st Edi. 2003,P.209 – 218.(tarjamo u dhow): {Isku dhicidda xaddaaradaha iyo dib-u-habaynta dunida}. Ujeeddada dhabta ah waa “ Ku dhicidda xaddaaradda Islaamka iyo dib-u-habaynteeda”.*

*13. *Qudheennu waa na la ku harbiyay, dagaallo, fitno, abtirsiinno-xifdiyid, hidde-bilaash ah raadistii, qab dhalasho(ximmiyadii jahliyada oo kale) si maskaxdeenna loo dhaqo, ilaa damiirkeenna qarannimo iyo hankeennii Soomaalinnimo la bakhtiiyo 30 sano gudahood, natiijadeeda waa tan keentay inaan cadowga dalkeenna ku soo hoggaaminno.*

*14. *Waxaan xasuustaa sideetamaatkii mar aan shaqo u joogay UK, in mudane ka tirsan Guriga Lordaadka Ingiriiska, dhowr meelood oo fagaare ah ka yiri : “Duulkaan mad-madow, fuqarada ah, khayraadkii dabiiciga ahaa Ilaahay ku mannaystay ka gaajoon, kana qaawan, aynu kala wareegno khayraadkaa, iyagana aan ka quuddinno”.*

*15.*Afghaanistaan oo dal sabool ah waxa ka dagaalamaya gaashaanbuur Mareykanku hoggaamiyo, oo 37(Soddon iyo Toddobo)dal ka kooban.*
*Fiiri Economist 23-29 June,2007,P.13 “Fatal errors in Afghanistaan”*
*Fiiri La Republica,No.24- June 25 ,2007.”Kabul e gli errori dell’Occidente”.*
*Labada maqaalba waxay saadaalinayaan jabka Reer Galbeed ,iyo dhibka loo gaystay dadka rayidka ah,oo dayaarado,si joogto ah loogu rusheeyo. Xikmo darradaas waxay keentay bey leeyihiin ,labada jariiddo, in shacabka Afghaanistaan oo dhan dagaal galo.Xxitaa Xaamid Karazai ayaa aabigaa ka cawday isagoo yiri “ dadka rayidka ah ee la dilo iyo guryaha dadka oo si sharci- darro ah loo fatisho waxay gaareen heer aan loo dul-qaadan Karin”. Fiiri isla maqaalka, The Economist iyo kan La Republica, oo yiri “waxay laayeen”{dayaaradaha Maraykanka} qoys 16 xubin ka kooban, iyagoo ku guuldarraystay inay gacanta ku dhigaan dagaalyahanno ay raadinayeen.*
*Waxaa muuqata inuu fashilmi doono”dagaalka lagula jiro argagaxisada. Intii Illahay garaad ku waxaday waa lagu qancinwaayey.*

Haddii laga raystay khatartii dunida qarka u saarnayd, in laysu adeegsado hub nuklear ah, maxay tahay sababta loogu laba-lixaadsanayo dagaal-oogidda iyo hub-urursiga..? sababtu waxay tahay:

I. Miisaaniyaddii militeriga waa inaan la dhimin, weli la kordhiyaa, si tujaartii-dagaallada ay warshadahoodu u shaqeeyaan, dhaqaalaha dalkuna u liicin.

II. Markaa waa in la helaa dalal caasiyaal ah(rogue states),kooxo argagixisa ah(terrorist groups)*16, Dowlado awood soo koreysa lagu tuhunsanyahay, sirtoodana la gaari Karin, oo loo hub-gurto, lalana dagaallamo.*17.

Imberyaaliyadda cusubi, oo haatan soo carrab-dhabanaysa, qaanuun, ikhlaaq iyo diin tixgelin uma laha, qorshaheeduna waa mid ku socda neefsasho dheer: 2,020; 2,050; 2,100, si ay dib-ugu-habayso qaabka dhismaha dunida (remarking of world order), iyadoo aad mooddo inay sheeganayaan awood ka sarraysa tan addanaha lagu waxaday.*18. Si ujeddadaa loo garoo, xoogagga la xusay wax kasto way bannaysteen, si dadka dunida tabarta yari loo muquuniyo. Runtaada waa been. Beentooda waa run. Xaqaada waa hudur; xaqdarradooda waa xaq, ciddii diiddana waa laga jeebayaa. Diin ay sheeganayaan baa u bannaysay inay dunida rogaan dadkana laayaan, inta lagugu soo duulo, adiguna waxaad tahay mid diin,"fashiste" ah, ku mintida, istaahilinna in gurigiisa lagu weeraro. Hadduu maanta dagaalkii dunida ee seddexaad dillaaco, Ciraaq, Soomaliya iyo Afghanistaan wax wayn oo iska beddeli lahaa ma jiraan. Halaagga iyo holaca dagaalka hore bay ugu jireen. Waxaa yaabka yaabkii ah ummadahan lagu aabyooday, iskaba daa hanti iyo hodontooyo kale e, jiritaankooda la suulinayo, cid dhibaatadooda ka dhiidhiyaysa ma jirto. Cid runta ka sheegi karta, ama xaqa ku dhawaaqi karta ma jirto.

Sidii uu yiri Geeddi Abbaabow.*19. ; gar lahaansho keligeed wax ma tarto, garab[fuliya] ayay u baahantahay. Ducafaduna garab ma helayaan. Waxaa is waydiin mudan xaggay aadday isu damqashadii aaddane, sarrayntii nafta banii'aaddamka, oo la yiri iyadaa noolaha u sarraysa, Ilaahna karaameeyey.

---

*16.*Eqbal Ahmed – Confronting Empire- South end press- Massachusette( 2000) P. 92-100 , on the topic of " Unilateralism after the cold war. Eqbal stresses: The cold war is over, but the phenomenon continues({Dagaalkii qaboobaa dhammaa. Xaaladihiisii se way socdaan).*

*17.*The Economist, May 19th -25th ,2007, boggeeda kore waxaa cinwaan u ah: "America's Fear of China"(cabsida Maaykanku ka qabo Shiinaha) dhaqaaleyahannadu waxay filayaan in"tacabka gudaha dalka" ee Shiinahu[GDP] gaaridoonno kan Maraykanka, 20 Sano gudahood. Miisaanka bixinta ee Shiinahu [Balance of payment] wuu caafimaad qabaa, kan Maraykankuna aad buu u qaamaysanyahay,dunidoo dhan baa lacag ku leh.*

*18. *Fiiri Imam Ismaaciil Ibn Kathiir – markuu ka qisoonayo dooddii dhexmartay Nabi Ibraahim iyo Gaalkii Nemruud, oo Ilaahnimo sheegtay(Qur.Sur.1 Aayadda 257).*

*19. *Geeddi wuxuu ahaa, sida aan ka hayno sheekadiisa, Taliye- tiirriyaad (Tyrant), xukumi jirey Buur Hakaba, Buurta korkeedana deggenaa.*

Habeen iyo dharaar waxaan daawannaa Telefishanno muujinaya dad la saxuuqay, sidii balka dhulka u daadsan, iyadoo la cuntaynayo oo layska raamsanayo. In laga diiqoodo bal daaye, aadan dareemayn neerf yar oo ku dubaaxa.
Waqti gaaban ka dibna la hurdo, qarow la'aan. Xaaladdaa waxay ku dhacday markii nalaku sandulleeyay inaan xaqdarrada, aabiga iyo kibirka, kuwa xogga sheeganaya "nacam,nacam" niraahno, ama intaan gunuunacno, hanka laalaadinnoo aamusno. Ma aha keli ah inay warfaafinta wax marin-habaabsha ina haleeshay, ee damiirkeenna aaddane ayaa xiskiisii yeraaday, kabaabyo awgeed.*20.
Waa duni saababka loo rogay.Imberyaaliyaddu iyadaa sabab u ah haddi la waayo aaddane mid kale u jir-naxa,iydaana dalalkii nabdoonaa dagaal ku holcisay, weliba halaagga ay soo waddaa ka badan. Maanta waa Somaaliya, Ciraaq, Afghanistaan, Shiishaan, Libnaan. Beri waa Iiraan, Baakistan, Suuriya, Suudaan, Algeeria, Nigeria, Mali, Mauritaaniya, Chad,Niger, Senegal, Tunisia iyo Maqrib(Marocco),siday saadaalinayaan khubaradu.*21.
Qorshahaa waa fitno dalalkaa gudohood laga aloosayo,hub laysugu dhiibayo,argagixiso aan jirinna lagu abuurayo, si"laysaga difaaco".Naqshaddaa waynu naqaan; waa tii Soomaaliya lagu qabsaday.Marar badan Golaha Ammaanka,Ummadaha Midoobay ayaa laga "xalaalaystaa" si dal nabdoon loo qabsado.*22.
Waa cagsigii waajibaadkii loo asteeyay Goluhu,siduu qorayo cahdiga UM.
6 Bilood ka dib markii Soomaaliya la qabsaday;4 Bilood ka dib qaraarka GA ee UM,"banneeyay qabsashada Soomaaliya" nabadii soo dhowaatay,qaybtii danbe 2006 dii, waxay haatan ku laalantahay meel ay gaarin weligeed.*23
Sidaa awgeed,inay mucjiso dhacdo mooyee,intuu jiro maamulka W.Bush, ma filan karno in Soomaaliya nabad lagu soo dabbaalo.
Beenbaa laynoo sheegayaaye cid inoo hiillisaa,ama inoo garowda, heli mayno, xukunkii laynagu gardaduubay waxaa ku taalla shaabadda Golaha Ammaanka iyo tii Midowga Afrika.

---

*20. *Edward W.Said – forward in Eqbal Ahmed, OP. Citata, Introduction, P.XXII. Ibid XXVI : "We live in scoundrel time. This is the dark age of Muslim History, the age of surrender and collaboration, punctuated by madness".(tarjamo dhowayn ah: waxaynu joognaa waqtigii ardaasha. Waa xilligii ugu mugdiga badnaa, taariikhda Islaamka, waa xilligii is-dhiibida iyo cumalada[dalka iibsaday]. Waa xilli waalli dheehday".*
*Waa duni saababka loo rogay, siduu oron jirey sayidkii*

*21.Fi*iri the economist,June 16th-22nd 2007,P.45 Cinwaanka ah:"America`s war on terror in Africa".Waxaa jira qorshe- dagaaleed iyo tababarro ay Maraykanku ugu talagaleen Afrikada Galbeed iyo Midda Woqooyi, kuwaasoo la baxay: "Tran-Sahara Counter-Terrorism Partnership.".Xagga Aasiya waxaa suurta-gal ah in dagaal lagu qaado dhowr Dowladood oo soohdin la wadaaga Afghanistan, ee Aasiyada dhexe.*

*22.*Fiiri qoraalkayga "UN Sec.Council Ris. No. 1744 justifies Ethiopian occupation and aggression to Somalia, March 2007".*

*23.*Fiiri the Economist, June 2nd,2007 , P.41, cinwaanka ah : "Somalia, No Peace More Terror"*

Waxaana loo jeedaa in dalkeennu kala goog`o, magaceennana suulo. Waa qorshe hore u jirey,haddana hirgelintiisu ka socoto dalal dhowr ah, Ciraq ay ka mid tahay.*24.
Ninka Xabashi u soo kiraystay in Soomaaliya lagu qabsado,lama dhihi karo waa mid taariikhda war u haya. Waxaase la dhihi karaa waa mid quursadey GARAADKEENNA, dadnimadeenna iyo karaamadeenna.

## HILINKA TOOSAN EE HALGANKA
## HOWSHA XURAYNTA LABAAD EE SOOMAALIYA

A. waxaynu nahay shacbi la qabsaday,xurnimadiisana laga qadaay,oo loo celiyay heerkii gumaysiga waa gardaduub aynaan garan waxynu ku galabsannay,iyo waxay nagu gelayaanba.Waa dhacdo lagu dhakafaaro,oo lagu maqlo sheekooyinka khiyaaliga ah keli ah.*25. Cid loola ciirsadaana ma jirto.”Qayladu misaajidkii bay ka yeertay”.Sidaa awgeed, waa inaynu awooddeenna iyo tan Eebbe keli ah ku tashannaa, sidaynu ula soo noqon lahayn madaxbannanideenna. Dadkeenna yeeli mayo, in qaybtiisii xurowday, ay Xabashi gumaysato, wayna arkeen gumaysigu wuxuu yahay:Inuu yahay mid ku takri-fala diinteenna,cirdigeenna,xoolaheena iyo sharafteenna aaddane.

B. Waa maangaabnimo in cadowga walaal loo qaato,lana fahmi waayo hababkiisa gumaysiga ah:”Divide et impera”,uu dadka ku kala qaybsho.Wuxuu isku dayayaa in kooxba kooxda kale u adeegsado,si uu u sheegto inuu”amni xasilinayo”,isagoo kii hore u jirey burburshay,kana shaqaynaya in Soomaliya weligeed amni iyo ammaan helin.Waa in dadka la kiciyaa oo ay ka dhiidhiyaan gumaysiga.Qof waliba qalabkuu ku dagaallami lahaa diyaarsadaa.Qalbka ugu kartida badan waa niyaadda qofka,kana sare mari karta hub kastoo casri ah.

---

*Weli waa Economist,2nd june 2007, “most of recorded 1,600 dead are Civilians” Xabashidu waxay sheegtay inay dileen 1,000 dagaalyahaniin ah. Jariiddadan waxay beeninaysaa howraarta ah “Nabad iyo Guul baa ka jirta Soomaaliya” iyadoo tiri: ”despite Ethiopia`s claims of success, the country[Somalia] is in as perilous as ever”. ( tarjamo u dhow: Inkastoo Xabashidu sheegato guulo, haddana dalku khatar wayn buu weli ku sugan yahay.)*

*24.*Hore “Kissinger Plan “ baa loo yiqiin,30 Sano ka hor. Hadda se waxaad mooddaa inuu noqday “howl maalmeed” caadi ah, aan qorsoodi ahayn, oo dalalka la beegsanayo “malin-caddey” lagu fara-geliyo, laguna qoqobo.*

*25. *Waa KAFKESQUE=ciqaab”caqligu diidayo”oo qof la marsiiyo, inta isagoo nabad gurigiisa ku jooga, oo aabi iyo maag loo taxaabo, ka dibna maxkamad la hor-joojiyo, isagoon dembi galin, lana fahmayn waxa loo haysto; la xukumo oo la dilo. Waa nuxurka buugga: “Il processo” uu qoray Franz Kafka(1925).*
*Waa sheeko qofkii akhriyaaba caro iyo irkig ku reebta,shixnadda gardarro ay siddo awgeed.*

Dadka wax dhiirri-geliya dhegohooda waa inay ku dhacaan, sidaa awgeed, shacbiga halgankiisu socdo,iyo kan la doonayo inuu ku soo biro, waa in la gaarsin karo:

C. Dadaalka warfaafinta :

I. War idaacad laga siiddaayay oo joogto ah, gaarna ah, fariisin ku leh dibadda,dalka gudihisana la geeyo(meeshii suurta-gal ah);.

II. Dadka waa in la gaarsiiyo farriimo oraah ah,iyo kuwo qoraal ahba,sidii dhambaallada iyo"pamphletyo" ama "qardhasa" looga danleeeyahay gudbin talo, shididda shucuurta, tilmaanta wax-qabadka iyo howlgallada habboon.

III. Dhaq-dhaqaaqa kifaaxa dibadda, oo noocyo kala duwan ah (warfaafinta oo loo sheego xaladda Dalka, howl-gallada halganka gudaha, qabashada shirar iyo doodo dunida lagula socodsiinayo takrifalka loo gaystay Dalka iyo dadka, bannaan-baxyada), kuwaasoo lala socodsiinayo halganka gudaha dalka ka oogan.

D. Dadaalka arrimaha siyaasadda :

I. Waxaa dalalka dibadda lala socodsiinayaa xaaladaha ba'an ee ka jira Dalka, faragelinta iyo saamaynta qabsashada gumaysiga ee Dalka.

II. Xiriirro "Dibloomaasi" oo hiillo-doon ah, oo lala yeesho dalalka saaxiibbada ah, iyo kuwa la kasban karo,(gaar ahaan Asmara ergooyin ku leh).

III. Markay suurta-gal noqoto, qaddiyaddeennu waa inaynu gayno fagaareyaasha caalamiga, lagana difaaco (UN,EU,AU,LAS,ICO iyo meelihii kalee ee habbon).

IV. La darso wixii xuluul siyaasi noqon kara, lana go`aansado afkaarta loo bandhigi karo dalalka saaxiibbada ah,iyo bulshada caalamaka,qaddiyaddeenna danaysa, iyo soomaalidaba.

V. In la sugo lana ifiyo sharcidarrada uu ku joogo,"nidaamka camiilka ah" iyo siduu ugu fashilmay mamuulka dalka.

VI. In la howlgeliyo aqoonyahannada Soomaaliyeed,iyo kuwa saaxiibbada ah,sidey u soo bandhigi lahaayeen qoraallo,iyo doodo lagu ayidayo qaddiyadda.

E. Dadaalka Dhaqaalaha:

Halganku waa inuu leeyahay, ama yeeshaa,ilihii dhaqaale howsha lagu socodsiin lahaa, qof kastoo Soomaali ah,ama ruuxii kale ee taageero la diyaar ah, waa inuu qaaraankii ku soo aada baxshaa,inyay awooddii noqoto, nool iyo moodba.

F. Dadaalka Wacyi-gelinta :
Halganka Ilaah baa nagu farad yeelay.Waa in qof waliba u howlgalaa, kan gaabshaana lagu guubaabiyaa, xuraynta Dalka. Howsha wacyi abuuridda, ama xoojinteeda, waa inay ku guulaysataa sidii shacbiga Soomaliyeed, oo idil, uga soo horjeesan lahaa gumaysiga, una qaa`ibi lahaa waajibka halganka,iyo u huriddeeda wax kastoo qaali ah.

## DHISMAHA HOGGAANKA HALGANKA.

Halganka iska-caabbinta cadowga meel wanagsan ayuu marayaa haatan. Xoogag cusub ayaa maalin walba ku soo kordhaya.Hayeeshee, si shacbiga loo wada howlgeliyo,una dhismo xayndaabkii adkaa ee cadowga dib u riixi lahaa, waa in la abuuraa hoggaankii howlaha kor lagu tilmaamay isku dubbaridi lahaa, dejin lahaana hindisaha militeri, iyo kan siyaasadeed oo Dalka lagu xuraynayo.
Aragtidayada, marxaladda koobaad waa in qof kastoo aamminsan xuraynta dalka,uu ka mid noqdo Ururka Muqaawamada Soomaaliyeed, uuna guto howsaha uu halganka ka qaban karo, iyadoon shuruud lagu xirin.
Hoggaanka Muqaawamada (magac kastoo loo bixiyo ururka) oo baarkii tandiimka ah, waa in lagu doorto shirwayne, si degdeg ah loo qabanayo. xulidda xibnaha hoggaanka, waa in ugu yeraan, shuruudahan lagu saleeyo:

- Qof diyaar u ah qaddiyaadda inuu naf iyo maal u huro;
- Siiraddiisu wanaagsantahay;
- Karti iyo aqoon u leh hawsha laga rabo;
- Daneysi iyo jago-raadis ahayn;
- Casabiyad, iyo anaaniyad, Ururka waxyeelleeya, looga cabasanayn;
- Xajin kara sirta Ururka, dalka , diinta; dadkana daacad u ah.

Hoggaanka markii la xulo waa la dhaarinayaa.

**Xuska 1 da Luuliyo,2007,**
**Asmara,Eritrea.**

La xiriiri: maxaakimtaislaamiga@gmail.com

---

Faafin: SomaliTalk.com | July 13, 2007